

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan isbedelada lagu sameeyay xeerarka socdaalka ee ku saabsan faa'iidooyinka dadweynaha

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington (DSHS) waxay ogtahay in Waaxda Amniga Gudaha ee federaalka in ay soo daabacdey xeerarka kama dambeysta ah ee lagu dabaqi karo dadka qaata dheefaha dadweynaha ee cayiman. Waxaan dib-u-eegnay xeerarka waxaanna doonaynaa in aynu bixino macluumaadka saxda ah, la isku halleyn karo ee loogu talagalay shakhsiyaadka iyo qoysaska ee laga yaabo in ay saameyn ku yeeshaan siyaasadaha isbeddelaya. Halkan waxaa ku qoran waxa aynu ognahay.

- Barnaamijyada iyo adeegyada laga maamulo ama laga bixiyo Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa ay jiri doonaan waxaanna heli kara dadka xaqa u leh.
- DSHS waxaa ay sii wadaysaa in ay ilaaliso sir ahaanta macluumaadka shakhsiyeed ee macamiilka mana la wadaagayso macluumaadkan qofkale aan ka ahayn haddii loogu baahdo sharciga gobolka ama federaalka mooyee.
- Isbedellada waxaa ay saameyn karaa dadka codsanaya deganaansho sharciyeed oo joogto ah (kaararka cagaarka ah) ama soo gelidda Waddanka Maraykanka – oo ay ku jiraan dal-ku-galka lootariga la siiyo muhaajiriinta iyo codsashooyinka lagu cusboonaysiiyo, beddelayo ama kordhinayo mudada dal-ku-galka Waddanka Maraykanka.
- Xeerka ma saameeyo dadka sida sharciga ah u deggan dalka ee codsnaya jinsiyadda Mareykanka ama qaadashada jinsiyadda.
- Xeerkan cusub ma ahan mid lagu dabakhayo dadka soo-galeetiga ah oo dhan. Ma ahan mid lagu dabakhayo dadka qaxootiga ah iyo magan-galyo doonka ah, Soo-galootiga Aasiyaanka Maraykanka (Amerasian), Soo-galootiga Khaaska ah ee Ciraaqiyyiinta iyo Afgaanistaanka ah ee Haysta Fiisaha Dal-ku-galka, Dadka ka soo gala Kuubo/Hayiti, dadka xuquuqaha aadanaha u dooda ee lagu sii daayay si shardi ku xiran ama siideyn sharafeed, dhibanayaasha ka ganacsiga bani'aadamka (Fiisada-T), dhibanayaasha hawl dembiyeed (Fiisada-U), Soo-galootiga Dhallinyarada Khaaska ah ama VAWA (Hawl Dhibaato Loo Gaysto Dumarka) codsashooyin-shakhsiyeed.
- Markii hore, shaqaaluhu waxaa ay kaliya xisaabin jireen isticmaalka macamiilka uu isticmaalo caawimaada lacagta cadaanka ah ama isbitaal-dhigid caafimaad muddo-dheer ah marka ay tixgelinayaan codsigooda socdaalka. Isbeddelaya waxaa ku jiri doona dheefaha daryeelka caafimaadka, nafaqada iyo guryeynta qaarkood.
- Xeerka looma adeegsan doono in lagu dabakho dheefaha la helay ka hor taariikhda dhaqangalka xeerka. Dheefahan federaalka dheeraadka ah waxaa kaliya la tixgelin doonaa haddii qofka codsadey, loo oggolaadey ama uu helay dheefo ka-dib marka xeerka uu dhaqangaley. Iyada oo sabab u ah go'aanka maxkamadda ee xannibaya xeerka, ma garanayno taariikhda uu dhaqangalay.

- Isbeddelada laguma dabakhayo dhammaan noocyada dheefaha federaalka. Si aad u heshid liiska dheefaha isbedelka lagu daray ama laga reebay, fiiri Su'aalaha Inta baddan La Isweydiyo. Wax isbeddelo ah laguma sameyn dheefaha dowladda, inkastoo kaalmada kaashka ee degaanka iyo kuwa doelwadda la sii wadi doono in la tixgeliyo.
- Laguma tirinayo adeegsiga dheefaha ee xubnaha qoyska ee qofka. Isticmaalida dheefaha carruurta ama xubnaha kale oo qoyska ah ma ahaan doonaan kuwo loo xisaabiyo si lid ku ah qofka codsanaya deganaanshaha sharciyeed ee joogtada ah (kaararka cagaarka ah) ama soo gelidda Waddanka Maraykanka.

Dadka iyo qoysaska qabba su'aalooyin ama wel-welo khuseeya saamaynta isticmaalida dheefaha dadweynaha ee ku saabsan xaaladooda socdaal waxaa khasab ku ah in ay la xiriiraan qareenka socdaalka. Kheyraadyo ayaa laga heli karaa iyada oo loo marayo mid ka mid ah ururada lagu qoray bogga internetka ee Guddoomiyaha gobolka: <https://www.governor.wa.gov/issues/issues/safe-communities/immigration-and-refugee-resources>.

Intaas waxaa sii dheer, waxaad la xiriiri kartaa mid ka mid ah ururadan soo socda si aad u heshid caawimaad:

- Khatka tooska ah ee CLEAR: 1-888-201-1014
- Mashruuca Xuquuqaha Soo-galootiga ee Waqooyi-galbeed (NWIRP):
 - Xafiiska NWIRP Seattle: 206-587-4009
 - Xafiiska NWIRP Yakima Valley (Granger): 509-854-2100
 - Xafiiska NWIRP Wenatchee: 509-570-0054